Wadajir– guriga iyo dugsiga xanaanada caruurta

Furitaanka (Inledning)

Degmada Sigtuna waa iney caruurtoo dhammi ku ladnaadaan dugsiyada waana iney helaan fursad ay ku gaaraan horumar ugu badnaan mid le eg qof walba awooddiisa iyo xaaladdiisa shakhsi. Dugsiga iyo guriga ayaa leh waajibaadka inay si wadajir ah u abuuraan fursadaha ugu fiican ee horumarka iyo awoodda waxbarasho ee ardayda. Dugsiga ayaa ilmahaagu waxay ku guuleysanayaan aqoonta,ku xalinayaan dhibaatooyin, dejinayaan iska horimaadyo laguna horumarinayo awoodooda wax faham iyo sida ay ula dhaqmayaan dadka kale. Dadaaladaa waxay caruurtu u baahan yihiin qof weyn in gacan ka geysto inuu caawiyo.

Dugsiyadeena xanaanada ayaa waxaan ku dadaaleenaa inaan mas'uulka xanaanada caruurta la yeelano wadashaqeen ku dhisan kalsooni markaa oo aan isu aragno shariig ama saaxiib shaqo ayadoo diiradda la saarayo danta wanaagga caruurta. Si loo helo iskaashi iyo wadashaqeyn mirodhal ah waxay u baahan tahay in marka koowaadba ay caddahay mas'uuliyadda qof walba uu haysto,sida ay u eg yihiin qaababka wada shaqeynta iyo waxyaabaha la iska kaashanayo. Si wadashaqeynta guriga iyo dugsiga xanaanada uu noqdo sida ugu fiican ee macquul ah ayaa waxaan soo saarnay warqadda heshiiska wadashaqeynta kaasoo ka shaqeynaya dhammaan dugsiyada xanaanada ee degmada Sigtuna. Halkan waxaan markaa ku caddaynay dalabaadka iyo filashada aan midkeenba midka kale ka sugi karayo --- guriga iyo dugsiga xanaanada.

Hadafka wadashaqeynta guriga iyo dugsiga xanaanada

- in waalidka guriga iyo dugsiga xanaanada ay sida ugu wanaagsan ugu taageerayaan ardayda awoodooda waxbarasho iyo horumar.

- in waalidka guriga iyo dugsiga xanaanada ay helayaan wadajira u fahamsan yihiin hadafka iyo hawsha dugsiga xanaanada caruurta.

Dhammaan caruurta waa iney dugsiga xanaanada ku dareemaan amni iyo raaxo inta lagu jiro xilliga dugsiga , xitaa shaqaalaheena. Anagoo tuseyna rajooyinkeena ayaa waxaan siineynaa shaqaalaheenu fursad iney xoogga saaraan waajibaadka hawlahooda si fiican u gutaan iyo iney qorsheyaan oo ay ka baaraandegaan wacyi gelin iyo waxbarasho heer sare ah iyo in ay caruurta u qabtaan waxa ugu wanaagsan ee macquul ah.

Wada shaqeynta guriga iyo dugsiga

Mas'uuliyadda dugsiga ayaa si cad loogu qeexay sharciga dugsiga iyo barnaamijka manhajka waxbarasho ee dugsiga. Maamulaha dugisga ayaa

hoggaaminaya oo qaybinaya hawlaha dugsiga. Waa maamulaha dugsiga qofka go'aanka gaaraya sida maamulka dugsiga laysugu dubaridayo,sida hantida iyo khayraadka loo qaybiyo iyo sida uu dugsiga uu ugu dadaalayo inuu gaaro hadafkiisa.

Macallinka dugsiga ayaa asagana doorkiisa ciyaaraya inuu mas'uul ka noqdo waxbaridda.waa macallinka dugsiga qofka qorshaynaya, meelmarinaya kadibna dabagalaya in lagu dhaqmo nadaamka waxbarashada asagoo dejinaya shahaadada iyo qiimeynta heerka waxbarasho ee ardayda. Ardayda dalkan iswiidhan waxaa waajib ku ah iskuul. In ardaydu ay si buuxda uga soo baxaan waajibaadkooda waxbarashada iskuulka waa mas'uuliyad ay si wadajir u hayaan degmada iskuulku ku yaal,mas'uulka wakiil iyo mas'uulka caruurta.

Rajooyinka aad naga filan karto dugsiga xanaanada iyo xarunta

xilliga firaaqada.

- Waxaan ula dhaqanaa qof kasta oo hawalaha qayb ka ah tixgelin , saaxiibtinimo iyo ixtiraam marka la joogo dugsiga iyo dibeddaba iyo baraha bulshadda.
- Waxaan qorsheyneynaa waxbaridda ayadoo la raacayo qoraalada maamul iyo qiimeynta xirfadeed ee macallinka.
- Waxaan la shaqeyneynaa idinkiina u jooga guriga danaha wanaagga ee caruurta.
- Waxaan ka shaqeyneynaa inaan abuurno wadajir ka dhex dhaca kooxyada iyo deegaan amni,raaxo iyo ammaan u leh caruurtaada. Waxaan u shaqeyneynaa ka hortagid iyo inaan durba u dhaqaaqno hadii aan ka shakino sharaf dhac iyo takoorid waxaana ka caawimeynaa ardayda in ay wax ka qabtaan iskudhacyada iyo mushkilado kale.
- Waxaan ardayda siineynaa fursado si biseylnimo u qaadaan mas'uuliyad ayna saamayn ku yeeshaan habkooda waxbarashadooda.
- Waxaynu si joogta ah qiimeyn ku sameyneynaa oo aynu horumarineynaa hawlaha iyo waxbaridda si loo gaaro danaha wanaagga ardayda iyo dugsiga.
- Hadii aan u baqno in ilmahaagu aanay gaari karin hadafka aqoon waxaa qofka masuilka ilmaha loo dirayaa warbixin arrintaa ku saaban iyo tallaabooyinka uu iskuulku u arko in la qaado.
- Waxaan sanad walba dib u eegnaa qawaaniinta akhlaaqada dugsiga waxaanuna siineynaa ardayda fursad ay qayb kaga noqdaan qaabaynta qawaaniintaa. Waxaan si joogto ah uga shaqeyneynaa in dhammaan dadka jooga dugsiga iney ku dhaqmaan qawaaniinta.
- Hadii aan ka shakino in arday uu la kulmayo dhib iyo xumayn waxaa waajib inagu ah inaan u gudbino maamulka arrimaha bulshadda ee degmada sigtuna ashtakada welwel.
- Waxaan hubineynaa in aad hesho warbixin ku saabsan waxyaaba ka jira dugsiga waqtigan xaadirka ah ayadoo laguu soo marinayo qaanadaha xiriirka ee dugsiga, haddii ay soo baxdo in ilmahu wax ku dhacaan anaga lafteena ayaa si toos ugula soo xiriireynaa mas'uulka ilmaha

.

- Waanu dhegeysaneynaa aragtidaada iyo fikradahaaga ee ku saabsan hawlaha dugsiga anagoo u mareynaa hab wadahadal,barta kulamada iyo habk warqadda ra'yi bixinta ee sanadlaha.

Rajooyinkeena aan kaa qabno adigaaga ah mas'uulka caruurta

- Waxaad u qaabileysaa dhammaan hawlaha iyo dadka rugtan si tixgelin , saaxiibtinimo iyo ixtiraam ku dheehan marka la joogo dugsiga gudihii iyo dibbedii iyo baraha bulshaddaba.
- Waxaad taageero siineysaa oo aad ixtiraameysaa hawlaha,qawaaniinta iyo qiimeynta dugsiga waxaadna kala shaqeyneysaa dugsiga si loo helo wanaagga iyo danaha caruurta.
- Waxaa saamayn ku leh ilmahaaga oo ay qiimeynayaan sida aad uga hadleyso oo aad uga faallo bixineyso dugsiga. Adigoo mowqif fiican ka jooga oo faallo wanaagsan ka bixiya dugsiga iyo waxbarashadiisa ayaa waxaad tusaysaa in dugsigu uu yahay muhiim.
- Waxaad heleysaa warbixin ku saabsan hadafka uu ilmahaagu gaari rabo adigoo ku garab galaya inuu mas'uuliyad ku qaado hawlaha waxbarashada dugsiga.waxaad weliba heleysaa warbixino kale oo aad ka heleyso dugsiga iyo rugta xilliga firaaqada iyo adigoo mudnaanta koowaad siinaya ka qaybgalka kulamada waalidiinta.
- Dugsigu waxay goob shaqo u tahay ardayda iyo shaqaalaha labadaba sidaad darteed baad qaddarin buuxda ku siineysa xilliga shaqada ee shaqaalaha iyo xilliga waxbarashada ardayda. Markaad rabto inaad soo booqato dugsiga xilliga waxbarashada dugsiga ayaa waxaa loo baahan yahay inaad raacdo habkeena nadaam ee booqashada waalidiinta .
- Waxaad ixtiraameysaa akhlaaqda dugsiga waxaadna gacan ku taageereysaa ardayda iyo shaqaalaha dugsiga in la raaco nadaamkaa.
- Waxaad caruurtaad ku taageereysaa in ay waqtiga ku yimaadaan dugsiga ayagoo wata qalabka saxa ah ee maalindugsiyeedka, dharka ku habboon jawiga in ay diyaar noqdaan ayagoo nastay oo cunay quraacdooda.
- Haddii ilmaahaagu xanuunsadaan waxaad soo wargelineysaa subaxdii hore sida ku cad hab maalmeedka dugsiga. Guriga ha joogeen caruurta ilaa iyo inta ay ka fayoobaanayaan.
- Ilmahaagu waxay xaq u leeyihiin waajibna ka saaran yahay iney iskuulka yimaadaan. Marka loo baahdo fasax ka baxsan xilliyada fasaxa iskuulka ayaa waxaa la buuxinayaa foomka codsiga fasaxyada marka hore kadibna uu soo ogolaanayaa iskuulka .
- Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan ilmahaaga ama hawlaha dugsiga waxaad la xiriireysaa shaqaalaha dugsiga. Sida ugu macquulsan ayaad uga qayb qaadaneysaa qiimeynta hawlaha dugsiga tusaale ahaan adigoo jawaab ka bixinayaa warqadda rayi bixinta sanadlaha.

Barta wadahadalka iyo jidmareenada xiriirka iyo wadashaqeynta

Iskaashiga aan la leenahay qoysaska guriga ayaa waxaan la leenahay noocyo kala duwan oo warbixin iyo wadahadal ah. Anagoo habkaa iskaashi adeegsaneyna ayaa dugsiga xanaanada iyo qoyska waxay si wadajir ah mas'uul uga noqon karaan iskaashiga hawlaha si loo gaaro dan wadaagga ilmaha.

Warbixinta maamulaha (Rektorsinformation)
bil walbaa maamulaha dugsiga wuxuu isku dubaridaa warbixin loo dirayo mas'uuliyiinta caruurta. Habkaa ayaadna ku ogaan kartaa jadwalka dugsiga iyo wareegga sanadlaha iyo warbixino ku saabsan dhacdooyinka iyo isbedellada xaadirka ah.

Warbixin todobaadle
todobaad walba waxaa uu helaya mas'uulka caruurta warbixin oo uu ka helayo dugsiga. Markaad qayb ka qaadatid warbixintaa ayaa waxaad heleysa sawirka buuxa ee todobaadka ardayga ee dugsiga iyo tusaale ahaan warbixin ku saabsan maalmaha muhiimka ah.

Bogga ogeysiisaka ee dugsiga (Skolportalen)
warbixinada ku saabsan maqnaanshaha ardayga gaarka ah , jadwalka iyo horumarka aqoonta ardayga waxay ku qoran tahay bogga waxbixinada ee aqoonta ee degmada.

Qalabka Tempus
laga bilaabo xilliga dayrta ee 2019 ayaa masuuliyiinta caruurta ee ku jira firfircoonida xilliga firaaqada dugsiga waxay gelin karaan macluumaadka joogitaanka caruurta ee dugsiga qalabkeena barnaamijka cusub ee Tempus. Xitaa waxaad ka gelin kartaa internetka. Barnaamijka Tempus ayaa waxaa si sahal ah masuulka caruurta u arki karaa warbixinada xilliga firaaqada tusaale ahaan maalmaha qorshaha ee shaqaalaha dugsiga.

Barta kulanka wadatashiga
Dugsi walba waxaa ka jira barta kulanka wadatashiga waalidka. Wuxuu ka kooban yahay masullka waalidka, wakiilka shaqaalaha iyo maamulka iskuullka. Kulanka wadatashiga waalidka wuxuu kulmayaa ugu yaraan sanad dugsiyadeedkiiba hal jeer waxaana halkaasoo looga hadlayo arrimo muhiim u ah hawlaha waxbarashada dugsiga tusaale ahaan arrimo hawlaha iyo habsami usocodka dugsiga ee markaa taagan, hawlaha tayada ee nadaamsan iyo hawlaha sinaanta dad la dhaqanka.

Danta bartan kulanka wadatashiga waa in dugsiga uu fursad u helo inuu soo uruuriyo afkaarta masuuliyiinta caruurta inta aan la qaadin tusaale ahaan go'aano qaarkood. Hase yeeshee barta kulanka wadatashiga waalidka ma ahan guddiga go'aaminta ama kulan looga hadlayo arrimo gaar ah sida shaqaalaha , kooxaha shaqada ama caruurta. Dugsiga ayaa u qaabilsan inuu jiro ajeenda shir ee kulamadaa iyo in la qoro wadahadalada shirka.

Kulamada waalidka (Föräldramöten)
laba jeer sanadkiiba ayaa dugsigu wuxuu ku soo dhaweynayaa masuuliyiinta caruurta kulan warbixin. Kulamadu waxay u dhici karaan si gaar ah ama si la xiriirta furitaan bandhig faneed ama kulanmada waalidiinta kale.

Wadahadallada horumarka ardayda (Utvecklingssamtal)
hal jeer sanadkii ayaa wuxuu dugsigu kuugu casumayaa adigaaga ah mas'uulka caruurta wadahadalka horumarka caruurta. Danta laga leeyahay wadahadalka horumarka caruurta waa inaad ra'yi ka hesho awoodda waxbarasho & horumar ee ilmahaaga iyo hadafka ilmahaagu leeyihiin waqtiga soo socda. Danta waxay kaloo tahay in aan ka hadalno sida anaga , dugsiga iyo guriga , siyaabo kala duwan ugu taageeri karnaa ardaygu inuu gaaro hadafkiisa.

Shirarka
Haddii ay tahay wax aad adiga ama macallimiinta aad dooneysaan inaad ka yeelataan wadahadalllo buuxa,ballan gaar ah baad ka sameysaneysaan. Kulanka gaarka ah ama xiriiryada waxay dhacayaan xilliga waqtiga shaqada ee shaqaalaha.

Nadaamka shaqada marka waalidku soo boobooqanayao dugsiga xanaanada caruurta (Rutiner vid föräldrabesök)

Booqashada waalidka waxay badanaaba noqotaa mid aqoon iyo farxad ugu dheehan tahay ardayda iyo mas'uulka waalidka labadaba. Waxaan soo dhaweyneynaa markaa masuuliyiinta caruurta iney yimaadaan oo ay qayb ka qaadaan hawlaha dugsiga.Haddii aad dooneyso inaad ballansato booqasho waalid waa inaad ballanta sameysaa waqti fiican iyo adigoo la tashanaya acallimiinta dugsiga. Idinkoo wadajira ayaa waxaad qabsaneysaan hal maalin oo oo aad kulmi kartaan si booqashadu aysan ku imaan maalin ay socoto imtixaanada iyo waajibaadka iyo in macallinku uu helo waqti uu ku diyaariyo ardayda xasaasiyiinta ah si weji cusub oo qof weyn ah uu usoo geli karto fasalka. Macallinka fasalka wuxuu xitaa u baahan yahay inuu uu sii sheego maamulaha dugsiga booqashadaada fasalka si loo ogaado dadka dhex jooga dhismaha dugsiga oo dhan. Dugsiga waxaa joogi kara arday iyo shaqaale haysta shakshiyad la ilaalinayo amnigooduna waxaa muhiim u ah in adigaaga qof weyn ah ee jooga dugsiga aad ixtiraamto xeerka sirqarinta iyo inaad wax sawir ama filim ka qaadin ardayda ama shaqaalaha.

Telefoonka
Haddoo aad rabto inaad telefoon kula hadasho qof ka mid ah shaqaalaha dugsiga waxaad marka hore usoo direysaa email qofkaa markaa waan ku soo waceynaa marka aynu fursad haysano. Wadahadallada telefoonka wuxuu dhacayaa xilliga shaqada ee shaqaalaha.

Welwel iyo fikrado

Haddii aad qabto su'aalo ama xaaladda caruurtaada ee dugsiga u dareemeyso welwel waxaad marka hore la xiriireysaa masuulka fasalka ama wakiilka fasalka ee caruurta sababtoo ah ayaga ayaa si fiican u garanaya caruurtaada. Haddii su'aalahaagu ku saabsan yihiin maado gaar ah waxaad la xiriireysaa macallinka maadadaa. Haddii aad isleedahay weli welwelku weli wuu jiraa waxaad la xiriireysaa maamulha dugsiga.

Haddii adigoo wadahadal la yeeshay maamulaha dugsiga welina aad welwel qabto ama aad dareensantahay inaadan helin jawaab ku saabsan fikradahaaga markaa la xiriir maamulka arrimaha caruurta iyo dhallinyarada ee degmada oo aad kala xiriiri karto bogga internetka ee degmada adigoo raacaya cinwaanka ku qoran " Synpunkt Sigtuna".

Qofka ah mas'uulka caruurta wuxuu kaloo la xiriiri karaa wakiilka caruurta iyo ardayda ee degmada sigtuna (BEO). Wakiilka caruurta iyo ardayda wuxuu ka shaqeeyaa arrimaha ku saabsan taageerada gaarka ah, sharafdhac iyo xumayn,amni xummo iyo sinaanta macaamilada. BEO wuxuu markasta ka hanaqaadayaa danaha caruurta iyo xuquuqda ardayda ayadoo si cad diirada loo saarayo wanaagga danahooda. Haddii qofka mas'uulka caruurta uu dareemo in la xiriirka dugsiga uu gaabiyo markaa waxaa dhaqaaqaya ururka BEO oo hubinaya in codadka dhammaan dhinac walba la maqlo. Qofku xitaa wuu la soo xiriiri karaa BEO asagoon magaciisa muujineyn oo weydiin karaa arrimo ku saabsan la dhaqmid xumo iyo takoorid ka jirta dugsiga xanaanada caruurta iyo dugsiyada kale.

Jawaabcelin iyo dib u eegid
Haddii aad usoo dirto macallinka ama maamulaha dugsiga farriin elektarooni ah waxaad filaneysaa inaad jawaab ku hesho saddex maalmo shaqo gudahood,ayadoo ay shuruudu tahay in qofkaa uusan xannuunsaneen ama fasax ahayn. Haddii aad la soo xiriireyso shaqaalaha degmada waaxda maamulka caruurta iyo dhallinyarada waxaad isticmaaleysaa waxa loo yaqaan " synpunkt sigtuna" ee bogga internetka markaana waxaad jawaab ku heleysaa shan maalmo shaqo gudahood.

Qawaaniinta Hanaanka akhlaaqda (Ordningsregler)

Ardayda iyo shaqaalaha dugsiga oo idil ayaa si wadajir uga shaqeynaya in la helo jawi shaqo wanaagsan waxayna sida ku cad sharciga dugsgia ku heshiinayaan qawaaniinta hanaanka akhlaaq ee ka jiri doona iskuulka. Si dhammaan u raacaan qawaaniinta akhlaaqda ayaa waxaa muhiim ah in dhammaan, ardayda iyo dadka waaweyn labadaba ay yaqaaniin qawaaniinta nadaamka meesha iyo waxa dhici doona haddii uu qofku jebiyo qaanuunkaa.

Iskuul waliba wuxuu leeyahay qawaaniinta akhlaaqda u gaarka ah. Qawaaniinta akhlaaqda waxaa dib u eegaya ardayda,shaqaalaha iyo waalidka ayadoo la eegayo isbedellada lagu sameeyey qorshaha ka hortagga la dhaqanka takooridda iyo sharafdhaca sanad walba. Marka la furo dugsiga ayaa waxaad dulmareysaan , mas'uuliyiinta caruurta , qawaaniinta nadaamka iskuulka idinkoo wadajira caruurtiina kadibna aad saxiixeysaan. Ujeedada waa in ay tani noqoto fursad aad adigaaga ah mas'uulka caruurta kala sheekeesataan caruurta qawaaniinta akhlaaqda meesha. Warqadda la saxiixay waxay noqoneysaa macaamila tusaale ah oo aad ku heshiiseen inaad ku dhaqantaan.

Tallaabooyinka akhlaaqda sida ku cad sharciga u degsan iskuulka
Maamulaha dugsiga iyo shaqaalaha ayaa waxay u abuurayaan amni iyo jawi waxbarasho ardayda waxayna tallaabo ka qaadayaan oo ay sharciga keenayaan ardayga abuura rabshado iyo murugo. Maamulaha iyo shaqaalaha ayaa markaa waxay qaadayaan tallaabooyin degdeg kumeelgaar ah ee loo baahan yahay si loo hubiyo amniga iyo jawiga waxbarasho ee ardayda ama laga hortago akhlaaqda arday ee rabash abuurta. Tallaabooyinka aadaabta ee lagu dejiyey sharciga dugsiga waa: in laga qaado shayga , in la cayriyo, in meel la fadhiisiyo ,in laga wareejiyo fasalka iyo in laga joojiyo dugsiga ilaa muddo gaaban.

Iskuul waliba wuxuu leeyahay qeexitaanka hab farsamo u degsan marka qof uu jebiyo qawaaniinta u degsan iskuulka.

Hanaan waxqabad ee amniga iyo jawiga waxbarashada

Hanaankeena waxqabad guud wuxuu khusayaa dhammaan dugsiyada ayadoon loo eegin qaanuunka nadaam ee dugsigaa.Isla sharciyada ka shaqeeya bulshadda inteeda kale ayaa ka shaqeeya dugsiga. Wey wanaagsan tahay in la ogaado in sharci jebin ay horseed u noqon karto in maamulka dugsigu uu ashkato u diro booliiska.

La dhaqanka takoorka iyo sharaf dhaca

Xaalad kasta ee la dhaqan takoorid iyo sharaf xumayn waxay keeni kartaa falcelin ka yimaad shaqaalaha dugsiga. Qaddiyad walboo xumaantaa ah waa la dabageliyaa oo la xalinyaa.

Kombiyuutarada/ Qalabka Ipad

Waxaanu leenahay qawaaniin guud ee u degsan isticmaalka kombiyuutarada kuwaasoo ardaydu ay saxiixayaan inta ay haystaan marka kombiyuutar ama ioad laga bixiyo dugsiga oo loo qaybiyo ardayda.

Maqnaansho aan la ogoleyn / iskuul u goynta

Haddii uu arday uu ka maqnaado casharada dugsiga asagoon ogolaansho haysan waxaa mas'uulka caruurta loo soo gudbinayaa farriin sms arrintaa ku saabsan isla maalintaa.

Mamnuucidda mukhaadaraadka ama daroogda (Drogförbud)

Iskuuladeena waa ka mamnuuc mukhaadaraadka (daroogada). Mamnuuca wuxuu khusayaa dhammaan noocyada kala duwan ee tubaakada,khamriga iyo mukhaadaraadka daroogada iyo daawooyin aan dhakhtar soo qorin. Haddii iskuulku uu shakiyo ama ogaado in ilmahaagu uu nooc daroogada ah uu la xiriiray ama isticmaalay waan kula soo xiriireynaa. Qaddiyad walboo arrintaa ku saabsan waa la dabageliyaa oo la xalinyaa.

Waxyaabo rabash iyo qas keenaya

Shaqaalaha dugsiga ayaa sida sharciga ku xusan waxay gacanta ku dhigayaan shay walba oo loo isticmaalayo hab lagu rabshayo waxbarashada fasalka ama wax khatar keeni kara. Shay ama wax khatar keeni kara waxaa loo gudbinayaa booliiiska. Waxyaabaha ama alaab ardayda laga qaaday laakiinse aan wax khatar lahayn waxaa loo soo celin doonaa ardayda dhammaadka isla maalintaa shaqada iskuulka.

Kharibaad ama dhaawac (Skadegörelse)

Dhaawac loo geysto hantida iskuulka ayaa dacwad loo diri karaa booliiska.wey u wanaagsan tahay mas'uulka ilmaha inuu ogaado in sheegasho magdhawga dhaawac la geystay lagu soo rogi karo ardayga sababay dhaawac.

Haddii uu arday wax ka dhaawaco ama uu shay ka qaado arday kale , waa ardayga wax dhaawacay kan magdhawga ku waajib ah.

Dadka aan shaqada ku lahayn sooma booqan karaan dugsiga

Dadka aan shaqada ku lahayn laguma arki karo baaxadda iskuulka inta lagu jiro xilliga iskuulka ama xilliga firaaqada.haddii aan aragno qof aan lahayn sabab uu ku joogo agagaarka dugsiga waan u sheegeynaa oo ka eryeynaa meesha .

Dabagalka hawlaha

Waxaynu ku haysanaa dugsiga xanaanada ee degamda sigtuna wadajirka hawlaha tayada nadaamsan. Taasoo mecnaheedu tahay in dhammaan dugsiyada ay si joogto ah u qiimeynayaan oo ay horumarinayaan hawlaha sida ku xusan hab wadareedka guud. Ammaanka, ladnaanta iyo waxbarasho waxaa lagu dabagalayaa habka soo socda:

Baaritaanada waraaqaha rayi bixinta

Inta lagu jiro sanad dugsiyadeedka ayaa waxaanu qabaneynaa laba ra'yi qaadis halkaasoo aan ku dabagaleyno amniga iyo waxbarashada dugsiga:

- **Amni, ladnaan iyo waxbarasho**
  khibradda ardayda ee amni,ladnaan iyo waxbarasho waxaa ladaba raacayaa ayadoo la isticmaalayo warqad ra'yi dhiibasho dhammaadka xilliga dayrta. Dhammaan ardayda wey ka qaybqaadanayaan ra'yi dhiibashada. Warqadda ra'yiga waxay ka jawaab bixineysaa waxyaabaha loo baahan yahay in tallaabo laga qaado waxayna goobaabin gelineysaa goobaha ay ardaydu amni darro ka qabaan.

- **Warqadda ra'yi bixinta ee arday iyo waalid (Elev- och föräldraenkäten)**
  Xilli walboo gu ah ayaa waxaa la qaadaa ra'yi dhiibashada ardayda iyo waalidiinta halkaasoo ardayda ka tirsan fasalo la doortay iyo adigaaga ah mas'uulka caruurta waxaad qiimeyn ku sameyneysaa tayada hawlaha dugsiga midba si gaar ah. Warqadda rayi bixinta waxyaabaha ku jira waxaa ka mid ah suaalo taabanaya ka mid ahaanshaha bulshadda dugsiga,wada xiriirka iyo wada shaqeynta. Jawaabaha dhammaan waraaqaha rayi bixinta waa la isku keenayaa kadibna waxaa lagu falanqaynayaa oo lagu baarayaa heer dugsi waxbarasho iyo heer degmo. Ayadoo la eegayo waxa ka soo baxay warqadda rayi bixinta ayaa waxaa la qaadayaa tallaabooyin iyo hawlo firfircooni si loo horumariyo hawlaha dugsiga,markaa waa muhiim in inta ugu badan macquul ee masuuliyiin caruur ama waalidiin ay ka jawaabaan warqaddan rayi bixinta.

Qorshaha ka hortagga takooridda iyo macaamilada sharaf dhaca
Sannad walba maamulka dugsiyadu wuxuu dib u eegis ku sameeyaa qorshihiisa ku wajahan ka hortagga takoorka iyo macaamilada ku xadgudubka. Ujeedada hawlgalka dugsiga xanaanada ee hawlaha amniga waa in la horjoogsado, laga hortago iyo in la iska caabiyo macaamilada sharafdhaca, takoorka iyo faraxumaynta gudaha dugsiga Iskuul walabaa qorshihiisa waxaa lagu qeexay xaalad shaqo oo lagu falanqeynayo hawlaha ammaanka dugsiga islamarkaama la isu keeneyno dhammaan. Qorshahu wuxuu ka kooban yahay hawlo firfircooni iyo tallaabooyin lagu soo qaadanayo qorshaha hawlgal ee dugsiyada iyo qorshaha hawlgal ee madaxa masuulka (degmada). Shaqaalaha dugsiga waxay si wadajira ugula shaqeynayaan ardayda meelmarinta qorshaha.

Jawaabcelin ku wajahan mas'uulka caruurta (Återkoppling till vårdnadshavare)

Adigaaga ah masuulka caruurta waxaad qayb ka qaadaneysa hawlaha amniga ee dugsiga xanaanada caruurta iyo natiijada baaritaanada ra'yi qaadista marka la joogo kulamada waalidka xilli kastoo dayrta ah. Natiijada dugsigaaga xanaanada caruurta waa la isku uruurinayaa waxaana laga akhrisan karaa bogga internetka ee dugsiga xanaanada dhammaadka dhammaadka sanad dugsiyadeedka dayrta. Madaxa wakiilka (degmada) wuxuu isku keenayaa xitaa dhammaan natiijada tayada ee maamulka oo la isugu keenayo warbixin sanadeed lagu soo daabacayo bogga internetka ee degmada.

Waad ku mahadsan tahay dadaalkaaga

Waxaynu degamada sigtuna dooneynaa inaan helno dugsiyo xanaano iyo dugsiyo kale ay caruurteena iyo ardaydeenu ay usoo xiisaan halkaasoo ay shaqaalaheenu dareemaan in loo riyaaqayo hawlqabadkooda ayna ku qanacsan yihiin. Waxaynuna taa ku gaari karnaa wada xiriir iyo wada shaqeyn wanaagsan. Anagoo wadajira ayaa waxaan u dhisi karnaa caruurta,ardayda iyo shaqaalaha ku sugan dugsiyada xanaanada caruurta iyo dugsiyada kale ee degmada sigtuna jawi shaqo ee ugu wanaagsan ee macquul ah.